



Dhammaanteen waxaan u baahanahay guryo sugan oo kiradooda la awoodi karo si aan u helno meel nabdoon oo caafimaad qabta marka aan duqowno. Taas ayaa ah sababta aan taageero u siino dadka waayeelka ah ee la kulma culeys dhanka guryaha ah amaba guri la'aanta ah, ama aan usiino talooyin dadka ku jira Guryaha loogu talagalay dadka howlgabka noqda, ama aan dadka waayeelka ah ugu xirno Aged Care [hay'ada daryeesha waayeelada], isla markaasna aan u doodno dadka waayeelka si ay u helaan guri.

Adeegyadeena waxaa heli kara dadka reer Victoria ee jira 50 sano iyo wixii ka weyn, iyo dadka Aboriginal iyo Torres Strait Islander ka ah ee jira 45 sano iyo wixii ka weyn. Waxaan soo dhawaynaynaa dadka ka soo jeeda dhammaan dhaqamada, awoodaha, qowmiyadaha, jinsiyadaha, noocay doonaanba u galmadooda iyo dadka caqiidada diinta ku kala duwan. [oldertenants.org.au](http://oldertenants.org.au)

Level 1, Ross House,  
247 Flinders Lane, Melbourne  
(03)9654 7389  
[haag@oldertenants.org.au](mailto:haag@oldertenants.org.au)

Turjubaano ayaa la heli karaa haddii la codsado

Xafiiskeena waxaa lala soo geli karaa kursiga cuuryaamiinta

Somali – Soomaali

**Macluumaadka guryaha iyo taageerada loogu talagalay dadka waayeelka ah**





## Caawimaad ku aadan guryaha gaarka loo leeyahay

Dhib ma kaa haysataa bixinta kirada? Ma lagaa codsaday inaad guriga isaga baxdo? Haddii aad tahay qof da' ah oo ku nool guri kiro ah oo gaar (private) loo leeyahay, waxaanu ku siin karnaa talo si aad u xalliso arimaha milkiilaha gurigaaga ama wakiilka guryaha, waxaan sidoo kale kusiin karnaa macluumaad ku aadan fursadaha kale ee dhanka guryaha ah. Kawac Home at Last **1300 765 178** si aad u hesho macluumaad lacag la'aan ah oo ay waxkastana sir kuu yihiin

## Caawimaad ku aadan sidaad guri ku heli lahayd

Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo sidaad ku heli lahayd guri aad awoodid? Adeegeena Home at Last wuxuu dadka reer Victoria ee u qalma siin karaa macluumaad iyo taageero si ay u codsadaan Guryaha Dowlada ama Guryaha Bulshada ee la awoodi karo. Si toos ah ayaan kuu caawin karnaa, ama waxaan kugu xiri karnaa adeegyo kale haddii aanaan ku caawin karin. Kawac Home at Last **1300 765 178** si aad u hesho macluumaad lacag la'aan ah oo ay waxkastana sir kuu yihiin

## Caawimaad ku aadan sidaad ku heli lahayd Daryeelka dadka da'da ah

Ma u baahan tahay inaad caawimaad ku hesho guriga? Ma qabtaa suaalo ku saabsan daryeelka dadka da'da ah? Ma rabtaa inaad ogaato caawimada aad heli karto? Ka wac adeegayaga care finder [daryeel-baadigoobaha] **1300 765 178** si aad u hesho caawimaad ku saabsan sidii aad madax-bannaani ugu noolaan lahayd gurigaaga

## Caawin ah Guryaha dadka Hawlgabka noqday?

Doorashada, ku noolaanshaha, iyo ka tegista guryaha hawlgabku way adkaan kartaa. Miyaad ka welwelsan tahay muddada heshiiskaaga, ama kharash u muuqada caddaalad-darro ama xad-dhaaf ah, ama habka maamulku kuula dhaqmayo? Ka wac Retirement Housing Advice Service [Adeegga Talo-siinta Guryaha Hawlgabka] **(03) 9654 7389**



HAAG waxay qiraysaa taageerada Dawladda Victoria, Wicking Trust, Ian Rollo Currie Estate Foundation iyo maalgeliyayaashayada kale ee samafalka. Adeegeena care finder ka waxaa taageera Primary Health Networks [Shabakadaha Caafimaadka Aasaasiga ah] ee Victoria.